Puntland
Development &
Research Center



# KA-GUDBIDDA

## Suuragalka ah ee Marxaladda Siyaasadeed ee Soomaaliya 2020-2021.

Garowe, Luuliyo 2020
Dowlada Puntland ee Soomaaliyeed

@SomaliaPDRC

# TUSMADA

HORDHAC ........................................ 4

JAHWAREERKA DOORASHADA (2020/2021)........................................ 6

HABRAACA DARAASADDA........................................ 8

SIYAABAHA DF U ABBARTAY DOORASHOOYINKA 2020/2021 ........................................ 8

HABKA DOORASHO EE SUURTAGALKA AH ........................................ 10

TALOOYINKA QAABKA DOORASHADA........................................ 11

WELWELKA JIRA ........................................ 16

GAARISTA HESHIIS SIYAASADEED ........................................ 16

# MACNAHA EREYADA

| | |
|---|---|
| DF | Dawladda Federaalka |
| DXDF | Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka |
| BF | Baarlammaanka Federaalka |
| GSH | Golaha Shacabka |
| AS | Aqalka Sare |
| HQHC | Hal Qod Hal Cod |
| DKMG | Dastuurka Ku-Meel-Garka |
| SPA | Somali Public Agenda |
| DFKMG | Dawladda Federaalka Ku-Meel-Gaarka |

## HORDHAC

Arrinta loogu hadal hayn badan yahay intii ka dambeysay burburkii dawladda Soomaaliyeed iyo dadaalladii faraha badnaa ee loogu jirey dib-u-dhiska qaranka (1991 - 2000), waxa ay tahay sidii loogu heshiin lahaa qaab ka qayb-gal siyaasadeed oo saldhig u noqda dhismaha dawlad qaran oo majaraha u qabata hannaanka dib-u-dhiska qaranka. Shirweynihii Dib-u-heshiisiinta iyo Nabadeynta Soomaaliya ee ay marti-gelisay dawladda Jabuuti sanadkii 2000, oo ay ka qayb-galeen ergooyin ka kala socday beelaha Soomaaliyeed, ayaa isku waafaqay in qoondeynta kuraasta Baarlamaanka Ku-meel-gaarka ah ee Qaranka saldhig looga dhigo hab saami-qaybsi beeleed oo loogu magac daray habka 4.5. Iyada oo la adeegsanayo habkan ayaa Baarlamaankii ugu horreeyey ee Ku-meel-gaarka ah, oo ka koobnaa 245 Xildhibaan (Markii dambe noqdey 275 sanadkii 2004, Embagathi, Kenya), xilka loo dhaariyey 13 August 2000. Baarlamaanka Ku-meel-gaarka ah waxa uu madaxweyne ku-meel-gaar ah u doortay Mudane Abdi-Qasim Salad 25kii August 2000, oo isaguna doortay Raysal Wasaare 8dii Oktobar 2000 iyada oo weli la joogo Djibouti. Xilalkaa markii la buuxiyey, dawladdu waxa ay u wareegtay Muqdisho.

Maamulka curdanka ah waxa loo xilsaaray inuu saddex himilo oo heer qaran ah ku fuliyo muddo dhan saddex sano oo ka bilaabaneysay dhammaadkii 2000 illaa horraantii 2003. Saddexdaa himilo waxa ay ahaayeen:

1. Dhaqan-gelinta Dastuurka Qaranka oo lagu ansaxiyay afti dadweyne;
2. Dib-u-dhiska dawladda qaran ee mas'uulka ka noqon doonta dalka oo idil iyo dhamaan muwaadiniinta ku nool, kuwa u dhashay iyo kuwa deggan-ba;
3. Sameynta doorasho loo dhan yahay oo inta badan loo yaqaan doorasho Hal-Qof-Hal-Cod (HQHC).

Waxa la filayey in qabashada doorasho guud oo heer qaran ah ay meesha ka saarayso nidaamka 4.5, taas oo muujineysa in nidaamkaasi ahaa mid loogu talo-galay markaas keliya la adeegsado. In kasta oo ayan maangal ahayn in saddexdan himilo lagu fuliyo muddo saddex sano gudahood, haddana waxa guul-darro weyn ah in aan waxba laga qaban 20 sano ka dib. Qabashada doorasho toos ah kuma aysan jirin ajandaha qabanqaabadii lagu aasaasay Dawladda Federaalka KMG ah - (2004 -2008), Dawladda Federaalka KMG labaad - (2009 - 2012) iyo weliba dawladdii ka dambeysay tan Ku-meel-gaarka - (2012 - 2016/17) waayo waxaaba lagu quus- gaabnaa in doorasho dhici karto in kale.

Ansixinta dastuurka federaalka ku-meelgaarka ah (DFKMG) ayaa dawladda ka saartay marxaladdii ku-meel-gaarnimada ((2000-2012) iyo in loo gudbey dalwadnimo oo rasmi ah. Aqoonsiga rasmiga ah ee DF ay aqoonsadeen qaar ka mid ah dawladaha waaweyn ee caalamka waxa uu astaan u noqday bilow cusub oo ku astaysan in Soomalia dib u hanatay maqam dawlad rasmi ah ee heer caalami ah. Si loola jaan-qaado jawiga cusub ee ku dheehnaa rajo sare, mudnaanta qaran waxa noqday in Soomaaliya laga hirgeliyo doorasho caam ah oo ka madax-bannaan qaabka beelaha, dhamaadka 2016. Heshiiskii New Deal ee ay horraantii 2013 London ku kala saxiixdeen dawladda DF iyo Bah-wadaagta Caalamiga ee Soomaaliya (Somalia's International Partners) waxa uu hoosta ka xarriiqayey in doorashada guud ee baarlamaanka la qabto bisha Agoosto 2016.

Madasha Hoggaamiyayaasha Qaranka (MHQ) oo ka kooban Madaxda hay'adaha Federalka iyo Madaxweynayaasha dawladaha xubnaha ka ah dawladda Federaalka (DXDF) aya 19 iyo 20 Febraayo 2015 ka dhacay magaalada Muqdisho si loo qiimeeyo suurtagalnimada in la qabto doorasho baarlammaan oo HQHC ah. War-murtiyeed ay MHQ soo saartay 21-kii Oktoobar 2015 wuxuu qeexay in "aaney jirin duruufihii suurtagelin lahaa qabsoomidda doorasho HQHC ah, taa beddelkeedna la qabto doorasho dadban (taas oo aan gaareyn hal-qof-hal-cod)".

Ayada oo la raacayo go'aanka MHQ waxaa lagu guuleystey in 27 ki Disember 2016 la dhammaystiro doorashada Golaha Shacabka (GSH) ayada qaabka saami qabsiga beelaha ee 4.5. Aqalka Sare (AS) ee 1aad waxaa xilka loo dhaarshey isla maalintaas (27kii Diseembar 2016). Intaa ka dib, labada aqal ayaa wadajir u doortay Mudane Mohamed Abdullahi Mohamed Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya 8dii Fabraayo 2017.

Go'aammada kale ee MHQ ay gaartay waxaa ka mid ah in hay'adaha Federaalka ee cusub ay hirgeliyaan ka-guurista habka 4.5 iyo u-gudbidda doorasho guud ee Baarlammaan oo ku dhisan habka axsaabta badan marka la gaaro xilliga qabsoomidda doorashooyinka baarlammaanka ee ku began Disember 2020.

# JAHWAREERKA DOORASHADA (2020/2021)

Ku guul-darreysiga dawladda hadda talada haysa in ay fuliso shuruud lagama maarmaan ah dhanka doorasho loo dhan yahay waxa ay halis ku tahay joogteynta dhaqankii soo jirey illaa sanadkii 2000 ee ahaa in doorashada la qabto wakhtiga loogu talo-galay, lana wareejiyo awoodda. Marka muwaadiniintu waayaan fursad ay ugu codeyn karaan musharraxiinta ay doonayaan, isla markaana ku sii jiraan xukun awood sharciyaddeedu dhamaaday oo doonaysa in ay muddada kordhisato, waxaa loo arkaa inay tahay khatar laba-laab ah. Hay'adda Heritage waxa ay warbixinteedii Luulyo 2019 ku qortay "waa wax aan suuragal ahayn in dalka laga hirgesho doorasho HQHC oo xor iyo xalaal ah, iyada oo 18 bilood ay ka hartay xilli- xukuumadeedka dawladda hadda jirta". Warbixintu waxa kale oo ay xustay in "muddo kordhinta ay kala dhantaaleyso geeddisocodka dimuqaraaddiyadda Soomaaliya". Xaqiiqada jirta darteed, waxa lagu talo-bixinayaa in "daneeyayaasha muhiimka ah (DF, DXDF ururrada/axsaabta siyaasadeed ee diiwaangashan) ay wada-tashi ka yeeshaan, kuna heshiiyaan, qaab doorasho lagu guuleysan karo oo loo adeegsado doorashada soo socota".

Ma aha oo kaliya inaan heshiis la gaarin illaa iyo hadda, balse arrinta kama ayan wada xaajoon dawladda federaalka iyo daneeyayaasha kale. Si kastaba ha ahaatee, doorashadu kama mid aha hawlaha uu dastuurku sida gaarka ah ugu xil-saaray dawladda federaalka. In kasta oo dawladda hadda talada haysa ay hakisay hannaankii federaalnimo, Soomaaliya waxay ka tirsan tahay dalalka caalamka ee ku dhaqma habka federaaliga ku dhisan iskaashiga (cooperative federalism), kaas oo waajib ka dhigaya iskaashi dhex mara mas'uuliyadaha heer qaran iyo kuwa heer dawlad-goboleed. Habka federaalka ku dhisan iskaashigu waa mid si cad ugu qeexan dastuurka ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya, maxaa yeelay sida ku xusan qodobka 51.3 waxaa waajib ah "in kulan sannadle joogto ah ay yeeshaan madaxda Fulinta ee Dawladda Federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, si looga wada xaajoodo, loogana heshiiyo: (a) Xoojinta midnimada qaranka; (b) Amniga iyo nabadda dalka; (c) Horumarinta dhaqaalaha qaranka, iyo siyaasadaha guud ee sayladaha dalka; (d) Xoojinta dhaqaalaha dadka ; iyo (e) Wadaagidda ama is-dhaafsiga macluumaadka/xogta ".

Sidaas darteed, DXDF saami sharci ah ayey ku leeyihiin go'aannada ku saabsan abaabulka iyo hirgelinta doorashooyinka heer qaran iyo weliba dhammaan arrimaha kale ee leh ahmiyad qaran. Cutubka labaad ee DFMG ah waxa uu sidoo kale si faah-faahsan uga hadlayaa xuquuqda muwaaddiniinta, waxa uuna

dammaanad-qaadayaa ku-dhaqanka xuquuqahaas, iyo weliba "Sixidda/magdhowga Ku-xadgudubka Xuquuqda Aadanaha" (PC, Qodobka 39). In kasta oo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranku (GMDQ) uu diiwaan-gelin ku sameysay ururro siyaasadeed oo fara badan, haddana weli waxa maqan hannaankii ay aqoonsi joogto ah oo xisbiyo siyaasadeed oo rasmi ah ku noqon lahaayeen.

DF dhegaha ayey ka furaysatay baaqyo is-daba-joog ah DXDF iyo saamileyda kale siyaasaddu ku codsanayaan in hannaanka doorashada ee soo fool leh laga yeesho wada-tashi iyo wada-xaajood siyasadeed. Bayaanno fara badan ee ka soo baxay Golaha Ammaanka ee Qarammada Midoobey (QM), Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee QM iyo saaxibbada Soomaaliya ee beesha caalamku ku codsanayaan in DF iyo DXDF yeeshaaan iskaashi, waxba kama beddelin siyaasadda DF ee ku dhisan isku-gaar-yeelidda siyaasadda dalka.

Qaar ka mid ah Xarumaha Cilmi barista madaxa bannaan iyo aqoonyahan Soomaaliyeed ayaa isu xilsaaray daraadado la xariira sidi dalka looga sabataxin lahaa is-mari-waaga siyaasadda iyo u kuur-gelidda fursadaha jira ee looga faa'ideysan karo doorashada 2020/2021. Talooyinka illaa iyo hadda la soo bandhigay waxa ka mid ah casriyaynta doorashadi dadbanayd ee 2016. Talooyinku waa ay kala duwan yihiin marka la eego heerka wanaajinta iyo ka qayb-galka, hase yeeshee dhammaantood waxa ay isaga mid yihiin in dhaqan gelinta hannaankii 4.5 ay noqotay ka fursanwaa, marki lixaad oo xiriir ah.

Xarunta Cilmi-baarista & Horumarinta Puntland (PDRC), oo ah hay'ad ka shaqeysa siyaasadda guud, waxa ay fulisay cilmibaaris laga wada qayb-galay oo ku saabsan isbedellada ama duruufaha sababay marxaladda adag ee is-mari-waaga siyaasadeed oo caqabadda ku noqday qabashada doorasho, ha ahaato doorashada tooska ah ee dadweynaha ama nooc kale oo loogu gudbi karo baarlamaanka federaalka ee soo socda 27$^{th}$ December 2020 iyo doorashada madaxweyne eek u began in ay dhacdo 7da Febraayo 2021. PDRC waxa ay adeegsatay habab kala duwan si ay fahan qoto-dheer uga gaarto waxyaabaha sababay is-mari-waaga siyaasadeed ee hadda taagan, iyo weliba in ay sahmiso fursadaha lagu dhaqaajin karo doorasho lagu wada kalsoonaan karo oo dhacda wakhti munaasib ah.

## HABRAACA DARAASADDA

Bilowgii hore, qorshuhu waxa uu ahaa in kulamada wada-tashiyada daraasaddu ay ka dhacaan magaalooyinka waaweyn ee dalka, oo ay ku jirto caasimadda qaranka ee Muqdisho iyo magaalo-madaxyada dawlad-goboleedyada. Xannibaadda safarka iyo amarka kala-fogaanta bulshada (social distancing) ee la xiriira ka hor-tagga cudurka COVID-19 ayaa wax ka beddelay qorshihii hore ee PDRC. Sidaa darteed, maaddama aysan suuragal ahayn in dad badan meel la isugu keeno, waxa la qaatay ka qayb-gal kooxo tiradoodu kooban tahay oo la kulmiyo wakhtiyo kala geddisan.

Natiijooyinkeeda draasadda waxaa lagu tifaftiray qaybaha IV iyo V. Qaybta IV gaar ahaan waxa ay ku saleysan tahay isku-dhafidda ka baaraandegidda daraasado la xariira mowduuca iyo u kuurgelidda wax-qabadka DF ee la xariira doorashada waxayna dibadda soo dhigtay nasiib darrada ah in aan la hirgelin duruufihi suurtagelin lahaa doorasho baarlammaan oo HQHC ku dhacda marka lag gaaro Disember 2020. Kulamo wada-tashi ee lagu qabtay Puntland ayaa ah ilaha ugu waaweyn ee qaybta, waxa ayna soo bandhigeysaa qaab doorasho oo dadban taas oo ah mid ay isku waafaqsanyihiin inta badan daraasadaha xarumaha cilmi barista iyo aqoonyahanno madax-bannaan. Qaybta lixaad waa iskuday looga baaraan-degayo caqabadda adag ee heshiis siyaasadeed looga gaari karo qaabka doorashada, kaas oo meesha ka saaraya in la qabto doorasho HQHC ah iyo kordhinta muddada xilka ee dawladda federaalka ee hadda jirta.

## SIYAABAHA DF U ABBARTAY DOORASHOOYINKA 2020/2021

Dawladda hadda jirta waxa ay ku adkeysatay in ay ka go'an tahay in ay qabato doorasho HQHC isla markaasna ay hirgelineyso duruufihi suurta gelin lahaa doorashada wakhtiga loo qorsheeyey. Qabashada doorashada HQHC ayaa waayahan ahayd arrinta loogu hadal-hayn badan yahay Soomaaliya, hase yeeshee waxa ay u muuqataa in diiradda la sarayo maalinta cod-bixintu dheceyso. Doorasho waxay koobtaa hirgelinta dhamaan bartilmaameedyada doorashada eek a horreeya maalinta codbixinta; qabashada cod-bixta iyo; hubinta natiijada doorasha iyo grasooridda tabashooyinka soo baxa cod-bixinta ka dib.

Marka hore, waa in dastuurka lagu caddeeyo nooca doorashada ee ka hirgaleysa dalka. Marka dastuurka lagu qeexo qaabka doorashada, waxa ay heleysaa

oggolaansho dadweyne, sababta oo ah dastuurku waxa uu ku yimaadaa wada-tashi siyaasadeed, la-tashi dadweyne, waxana ugu dambeyn lagu ansixiyaa afti dadweyne ama shirweyne guud. Nidaamka doorasho ee dastuurka ku qeexan ayaa saldhig u ah xallinta murannada la xiriira doorashada. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Kenya, David Maraga ayaa ku dhawaaqay doorashadii madaxweyne-nimo ee Kenya, August 2017, “in aysan ansax ahayn, oo ay ahayd waxba-kama jiraan" sababta oo ah "lama raacin dastuurka".

Hannaanka doorashada Soomaaliya wuxuu ka mid yahay meelaha DFKMG ahi uu qabyada DF 1aad (2012 – 2016/17) iyo DF2aad ee xilkeedu gabaabsiga ma qabyatirin dastuurka. Sidaas awgeed, ma jiro saldhig dastuuri ah oo lagu qaban karo doorashada guud ee baarlamaanka Soomaaliya dhammaadka 2020.

Sharciga doorashada ee uu saxiixay madaxweynaha 20 February 2020, ma aha oo keliya in uu la’ yahay saldhig dastuur, balse dhammaan warbixinnada siyaasadeed ee ay soo saareen hay’ado cilmi-baaris waxa ay ku tilmaameen sharciga mid aan la dhaqann gelin Karin. Waxyaabaha ka maqan sharciga waxa ka mid ah "qaabka kuraasta loogu qaybinayo degaann- doorashooyin (constituencies), xaqiijinta qoondada haweenka iyo in la qeexo dowrka axsaabta siyaasadeed”. Sharciyeynta habka 4.5 waa arrin walaac ku ah dhamaan Soomaalida leh garasho dimuqraaddiyadeed (democratic-minded) ee aamminsan in sinnaanta cod-bixintu tahay mabda’ aasaasi ah oo dammaanad u ah sharciyadda natiijada doorashada (legitimacy of the election outcome). Hay’adda Somali Public Agenda Policy (SPA) waxa ay sheegtay in habka 4.5 "muddo dheer la adeegsanayey Soomaaliya, laakiin aan wixi hadda ka hirreeyey lagu qorin shuruucda dawladda.”

In kasta oo sharcigu kuraasta ugu qaybiyo beelaha si la mid ah qaabka kuraasta baarlamaanka hadda jira ee ka kooban 275 xildhibaan, haddana sharcigu waxa kale oo uu qorayaa qoondo kuraas oo ku saleysan qaab degaan, taas oo u baahan in codbixiyayaashu si toos ah ugu codeeyaan musharraxa ay doonayaan. In kasta oo sharcigu ula jeedo in la gaaro doorasho loo dhan yahay, haddana arrintan waxa ay xad-gudub ku tahay mabda’a saldhigga u ah xuquuqda muwaaddiniinta ee ah in muwaaddin walba wax dooran karo lana dooran karo.

Madaxweynaha Puntland si cad munaasabado kala duwan uga sheegay in Puntland aysan aqbali doonin sharciyeynta habka 4.5 ee saami qaybsiga beelaha. Marka la eego doorashada Aqalka Sare (UH), sharciga waxa ka maqan qodobbo la xiriira hannaanka doorashada hay’addaas in kasta oo qodobka 12 ee isla sharcigu uu xeerinayo in labada aqal ee BF lagu dooranayo qaabka HQHC.

Dhibaatadu kuma koobna oo keliya waxyaabaha ka dhiman sharciga iyo fulin la'aanta sharciga, balse waxa kale oo ka mid ah jiritaan la'aan shuruucda axsaabta siyaasadda, diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha iyo xeerar fara badan iyo habraacyada anshaxa doorashada lagama maarmaan u ah doorasho la isku halleyn karo. Lama hayo liis rasmi ah ee xisbiyada ku tartami doona doorashada, mana jiro diiwaanka codbixiyayaasha oo sharcigu dhigayo in ay noqoto qaab diiwaangelin astaamaha gaarka ee qofka oo casri ah (biometric). Iyada oo ay shan bilood ka dhiman tahay doorashada baarlamaanka marka la eego dastuurka ku-meel-gaarka ah, haddana weli ma cadda murashaxiinta tartamaysta iyo iyo cod-bixiyaal, midkoodna.

Jiritaan la'aanta hannaan doorasho ee dastuurka dalku asteeyey iyo sharci doorasho oo dhaqan gal noqon kara waxaa dheer in guddiga doorashooyinku aanu helin tabar ku aadda qabashada doorasho HQHC ah mana jiro wakhti ku filan in awooddisa heerkaas lagu gaarsiiyo. Waxa albaabada la isugu dhuftay xafiisyadi Guddiga ee Puntland iyo Jubbaland ayada oo isla markaas doorasho lagu qaban karin Somaliland. Guddiga doorashadu wuxuu sheegay inuu cayimay xarumo lagu diiwaangeliyo cod-bixiyayaasha ee gobolka Banaadir iyo saddexda dawladood oo kala ah K.Galbeed, Hirshabeelle iyo G. Mudug oo aaney ku jirin meelaha ay ka taliso xarakada Al-Shbaabo. Waxaa kaloo la ogyahay in cayimidda xarumaha iyo hirgelinta diiwaangelintu iney yihiin laba arrimood oo kala fog.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxan shaki ku jirin in dawladda uu Madaxweye Farmajo hormuudka u yahay ay ka gaabisay gudashada waajibaadkeedii ahaa qabashada doorashooyin toos ah oo HQHC ah.

## HABKA DOORASHO EE SUURTAGALKA AH

Wada-tashigu waxa uu ka koobnaa saddex weji, iyada oo marka hore la qabtay kulankii ugu horreeyay oo waddada u jeexay hannaanka. Marxaladdan waxaa loo kala qaybiyey labo maalmood, horraantii Diseembar 2019 iyo dhamaadkii Janaayo 2020, waxana lagu qabtay maktabadda xarunta PDRC. Ka qayb-galayaasha waxa ka mid ahaa khubarro ku takhasusay sharciga, siyaasiyiin, xubno ka socday bulshada rayidka, dhallinyaro iyo haween. Ka dib marka la isla waafaqay ujeeddada iyo ajendaha kulanka, ka qayb-galayaasha waxa la siiyey hordhac kooban oo ku saabsan xilligii kala-guurka ee ka dambeeyey burburki dawladdii qaran laga bilaabo dawladdii qaran ee ku-meel-gaarka ahayd ee Dalka Jabbuti

lagu dhisay Ilaa laga soo gaaray doorashadii dawladda hadda talada haysa. Soo-jeedinta waxa lagu soo gaba-gabeeyey nuxurkii ka soo baxay kulankii ugu horreeyay ee MHQ ee Disember 2015, kaas oo hoosta ka xarriiqay "in aysan jirin xaalad lagu qaban karo doorasho HQHC sanadka 2016." Su'aasha weyn ee ay tahay in la is weydiiyo waa "ma jirtaa xaalad lagu qaban karo doorasho HQHC sanadka 2020 ama suurtagal ma tahay in lagu dhammaystiro wakhiga dhiman?"

Dhamaadkii maalintii koowaad, ka qayb-galayaashu waxa ay si wadajir ah isugu raaceen in duruufahaasi aysan jirin, laguna dhameystiri karin wakhtiga dhiman. Waxa kale oo la isla gartay in muddo kordhinta haya'daha federaaligu tahay arrin laga waantoobo.

Maalintii labaad iyo marxaladaha xiga ee kulanka wada-tashiga waxa loo gaar yeelay ka baaraan-degidda hababka kale ee doorasho oo ku lagu beddeli kara HQHC. Ka dib markii uu jiheystey ay hannaanka wada-tashiga, kooxda daraasadda ee PDRC waxa ay qabatay saddex hawlood oo muhiim ah, oo ay ku jiraan isku dubbaridka talooyinka ay ka qayb-galayaashu soo bandhigeen labada maalmood, ururinta aragtida ka qayb-galayaal gaar loo xushay iyo dad kale oo xog-ogaal ah, kaa baarandegidda daraasadaha kale; iyo diyaarinta warbixinta qabyada ah ee kama dambeysta, taas oo macluumaadka kala duwan si nidaamsan u soo koobeysa. Natiijooyinka daraasadda ayaa markaas lagu soo bandhigay madal heer sare oo ay ka soo qayb-galeen bulshada rayidka, khubarro sharci-yaqaanno ah, saraakiil sare oo ka socotay dawladda Puntland, siyaasiyiin, haween iyo indheer-garad.

Qaybaha hoose ee soo socda waxa ay soo bandhigayaan labada qaab ee ka qayb-galayaasha isku waafaqeen oo faallo ka bixinaya nuxurka wada-tashiga iyo aragtiyo gaar-gaar ah oo ka soo baxay kulanka wada-tashiga. Tani waxay muhiim u tahay soo bandhigista aragtida hay'adeed, isla markaana waxa ay bixinaysaa fursad lagu maqlo dareenka weyn ee dadku qabo.

## TALOOYINKA QAABKA DOORASHADA

Qaabka lagu talo-bixiyey waxa uu ku dheehnaa “HA UGA DARIN” – Do No Harm - iyada oo laga taxaddarayo soo if-bax dabaqad siyaasadeed iyo xidideysiga illaa heer bulsho, iyada oo isla markaa dhidibbada loo aasayo dhex-dhexaadnimo iyo dareen waddaniyadeed oo xooggan iyo rabitaan. Naqshadeynta, anshaxa iyo natiijada doorashada waxa la doonayaa:

(a) In lagu ilaaliyo nidaamka dawladeed ee baarlamaanka ee soo bilowday sanadkii 2000, lagu asteeyey dastuurka 2012ki. Natiijada doorashadu waa in u gogol-xaarto gaaritaanka doorasho guud oo axsaab badan sanadka 2024 iyo joogtey nidaamka dimuqraaddiga ah;

(b) In la ilaaliyo Nidaamka Federaalka ee la qaatay 2004, kuna yaal dastuurka ku-meel-gaarka ah, isla markaana la dardar-galiyo hirgelinta federaalaynta dalka;

(c) Golaha Shacabka ee 10-aad (HoP) iyo Aqalka Sare ee 2-aad in ay dhaqan-geshaan ka qayb-gal iyo u-nuglaan baahida muwaadiniinta, iyaga oo si wax-ku-oolnimo leh u gudanaya waajibaadkooda dastuur ee kor-joogteynta madaxweynaha iyo xukuumadda. Barlamaanka federaalka ee la soo doorandoono waa in uu si dhab ah uga baaraandego barnaamjka xukuumadda, Ra' iisul Wasaarahana su'aalo ka weydiiyo ugu dambayntiina faro inuu dibu-eegis lagu sameeyo hadii aan jiraan dhaliilo ka muqqda barnaamijka inta aaney iska siin kalsooni. La xisaabtanka masu'uuliyiintu wuxuu la kowsada marka ay xilka qabtaan waana inuu ahaado mid joogta ilaa laga gaaro heer uu noqdo hannaanka is-xukunka dalka.

(d) Ra'iisul-wasaaraha soo socda waa in uu adeegsado awooddiisa ah madaxa Golaha Wasiirrada, taas oo waafaqsan dastuurka ku-meel-gaarka ah oo qeexaya "Awoodda fulinta ee Dawladda Federaalka waxa haya Golaha Wasiirrada " (PC, 79.1).

(e) Madaxweynaha la doorandoono waa in uu guto waajibaadka dastuurku farayo oo ah Madaxa dawladda (Head of the State) sida ku cad qodobka 90-aad ee dastuurka uuna ka dhawrsado fargelinta hay'adda fulinta oo dastuurku u gaar yeelay Ra'iisul Wasaaraha.

Si loo ilaaliyo astaanta federaal ee jamhuuriyadda, qaabkii wax qaybsiga dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka ee labada aqal ee baarlamaanka federaalka 2016-dii ayaa dib loo adeegsan doonaa 2020ka. Go'aanka qabyada ah ee hadda hor yaal aqalka sare ee baarlamaanka, kuna saabsan qoondaynta cusub ee kuraasta Aqalka Sare 2020ka, waxa uu ku saleysan yahay qaab gobol, mana tixgelinayo jiritaanka dawlad-goboleedyada. Arrintan waxa ay astaan u tahay khatar ku soo socota hannaanka federaalka. Shaxda 1 ee hoose waxa ay muujinaysaa sida dawlad-goboleedyadu u qaybsanayaan Xubnaha Baarlamaanka Federaalka 2020 si la mid ah qaabkii 2016-dii.

**Shaxda 1 FMS-yada, Qaybinta HoP iyo UH by FMSs sanadka 2020**

| Maamul-goboleed / Gobol | Caasimadda | Saamiga Kuraasta Golaha Shacabka | Saamiga Aqalka Sare |
|---|---|---|---|
| **Puntland** | Garoowe | 37 | 11 |
| **Galmudug** | Dhuusamareeb | 36 | 8 |
| **Hirshabeelle** | Jowhar | 37 | 8 |
| **K / Galbeed** | Baydhabo | 69 | 8 |
| **J.Land** | Kismaayo | 43 | 8 |
| **S.Land** | TBD ∗La go'aansho | 46 | 9 |
| **Bulshada reer Benaadir** | Muqdisho | 7 | ? |
| **Wadar** | | 275 | 54 |

∗TBD: - In La Go'aansado.

Iyada oo la tixgelinayo hawlaha faraha badan ee loo baahan yahay in la qabto, xalka keliya ee jira waxa uu yahay in marka hore la xurmeeyo madax-bannaanida DXDF ee uu dammaanad qaadayaan dastuurrada qaranka iyo kuwa DXDF. Sidaas awgeed, doorashada baarlamaanka ee 2020 waa iney ka dhacdo xarumaha DXDF, qaadaan mas'uuliyadda ammaanka doorashada, isla markaana ay madaxda fulinta iyo sharci-dajiyeyaasha loo daayo xulashada/doorashada xubnaha Aqalka Sare.

Heerka casriyaynta doorashada 2020 marka la barbar-dhigo sanadkii 2016 waxaa ay ka muuqanaysaa baaxadda ama tirada cod-bixiyayaasha iyo goobaha ay ka dhacayso doorashada. Marka laga hadlo cod-bixiyayaasha, heerka bilowgu waxa uu noqon doonaa Doorashada ku dhisan Saami-qaybsiga Beelaha (ECC) ee wadaaga hal kursi ama in ka badan. Hoggaamiyeyaasha sare ee dhaqanka ayaa go'aamin doona degaannada kuraas loogu tartami doono, iyaga oo la tashanaya madax dhaqameedyada kale sidii sanadkii 2016, halka murashaxiina u tartamaya kursiga ay ka soo bixi doona oo kaliya degaannada la cayimay. Ergada loo soo xulay hal kursi waxaa laga kordhin doonaa 51 (oo ahayd 2016), waxana la gaarsiin doonaa 101 sanadka 2020.

Shaxda 2 ee hoose waxa ay soo bandhigaysaa tirada cod-bixiyayaasha ee halkii kursi, maamul-goboleed iyo heer qaran ee sanadkii 2016. Tirada cod-bixiyaasha ee heer qaran waxaa ay ahayd 14,025 sanadkii 2016 waxana la gaarsiiyey 27, 775

sanadka 2020, taas oo aan badneyn. Maaddaama kordhinta tirada cod-bixiyayaasha u codeynaya kursigii sanadka 2020 ay ahmiyad gaar ah u leedahay doorashada codbixinta halkii kursi waa shuruud muhiim u ah yareynta iibsiga codka oo ahayd caqabad jirtay sanadkii 2012-kii. Hase yeeshee, kordhinta tirada codka ee 101 kama reebeyso iibsiga cod dadka hantida leh. Waxa la isla gartay, si taas looga hortago tiro yaraan cod-bixiyayaasha u codeynaya kursigiiba ka dib marka kordhin 100% oo dheeraad ah lagu sameeyo, waxa loo baahan yahay tabab kale oo lagu xakameeyo cod-iibsiga. Kordhinta aagagga ku habboon in ay ka yimaadaan ergooyinka dooranaya hal xildhibaan oo ka tirsan Golaha Shacabka ayaa loo arkay inay tahay shuruud kale oo lagu xoojinayo doorashada 2020.

### Shaxda 2 Tirada Cod-bixiyayaasha Heer Maamul-Goboleed iyo Heer Qaran

| Nr | Maamul-Goboleed | Kuraasta Maamul-Goboleedka | Kuraasta Ergada | Wadarta Guud ee cod-bixinta Dawlad-goboleed Walba - 2020 | Wadarta cod-bixinta Dawlad-goboleed Walba - 2016 |
|---|---|---|---|---|---|
| **1.** | Puntland | 37 | 101 | 3737 | 1,887 |
| **2.** | Galmudug | 36 | 101 | 3636 | 1.836 |
| **3.** | Hirshabeelle | 37 | 101 | 3737 | 1,887 |
| **4.** | K. Galbeed | 69 | 101 | 6969 | 3519 |
| **5.** | J. Dhul | 43 | 101 | 4347 | 2193 |
| **6.** | S. Dhul | 46 | 101 | 4646 | 2346 |
| **7.** | Banaadir | 7 | 101 | 707 | 375 |
| **8.** | Codadka | 275 | | 27, 775 | 14,025 |

Doorashadii 2016 waxaa ay ka koobneyd laba marxaladood, iyada oo ugu horreyn la soo saaray ergada iyada oo loo marayo hab-beeleed, ka dibna doorashada lagu qabtay caasimadaha maamul-goboleedyada. Hannaanka la soo jeediyey ee 2020 waxa uu marayaa saddex marxaladood, oo u baahan in marka hore beeluhu soo xushaan ergooyinka, ka dibna ergooyinka laga dhigo hal kudlad cod-bixiyayaal heer gobol (one Regional Voting block), ugu dambeyntiina

loo gudbo seejooyinka ay doorashadu ka dhacayso ee caasimadda maamul-goboleedka (1-2 gobol), lana ballaariyo baaxadda juqraafi ahaaneed ee doorashada, daa-dejinta doorashada illaa heer degmo meelaha xaaladuhu oggolaanayaan in la gaaro goobo ka baxsan caasimadda maamul-goboleedka, in xildhibaannada si wadajir ah looga soo dhex doorto murashixiinta ka soo jeeda gobol iyada oo aan loo eegin beel.

Shaxda 3-aad waxa ay muujineysa Puntland oo tusaale u ah doorashada ku saleysan qaab gobol sannadka 2020. Murashaxa ugu codka bata marka codeyntu dhamaato ayaa lagu dhawaaqayaa inuu guuleystay sida uu qabo nidaamka “Horgalaa Guuleysta” (First Pass Post).

**Shaxda 5. Tusaale Puntland ee Saambal ku-saleysan Qaab Gobol – marka lagu daro caasimadda**

| Nr | Gobollada | Kuraasta | Cod-bixiyeyaasha halkii Kursi | Tirada Ergada/gobol | Tirada Codadka |
|---|---|---|---|---|---|
| **1.** | Nugaal | 4 | 101 | 404 | 1,616 |
| **2.** | Sool | 7 | 101 | 707 | 4,949 |
| **3.** | Bari | 10 | 101 | 1 010 | 10,100 |
| **4.** | Sancaag | 5 | 101 | 505 | 2,525 |
| **5.** | Mudug | 11 | 101 | 1,111 | 12,221 |
| **6.** | Wadarta | | | 3737 | 31,411 |

## WELWELKA JIRA

Intii ay socdeen kulamada wada-tashiga, waxa diidmo badan laga muujiyey habka wax-qaybsiga 4.5, waxana taageero weyn loo muujiyey habka awood-qaybsiga ku saleysan degmooyinka. Dadka qaba aragtidan waxa ay tilmaameen in 92-da degmo saldhig looga dhigo qaybsiga kuraasta Golaha Shacabka ee soo socda, oo aan la qaadan habka 4.5. Marka la eego aragtidan, suurtagal ma aha in la gaaro habka doorashada OPOV inta wax lagu qaybsanayo habka 4.5.

Odayaasha dhaqanka looma arko inay yihiin dhex-dhexaad, dadka qaarkoodna waxa ay qabaan in aad hoos loogu dhigo dawrka ay ka qaataan doorashada.

Waxaa kale oo lagu talo bixiyey in dawladda Puntland kaalin muhiim ah oo siyaasadeed qaadato, iyada oo ugu horreyn ku adkeysaneysa qaabka doorashada ee ku dhisan degmooyinka. Waxa xusid mudan in qaar ka mid ah siyaasiyiinta waaweyn ee Puntland ay ugu baaqeen dawladda Puntland inay yeelato "xal kale oo lagu beddeli karon - fall back option" iyada oo cuskaneysa Qodobka 4.4 aad ee Dastuurka Puntland, kaas oo awood u siinaya dawladda Puntland inay dib-u-eegis ku sameyso halka ay Puntland ka taagan tahay dawladda qaranka.

## GAARISTA HESHIIS SIYAASADEED

Heshiiska siyaasadeed ee sida degdegga ah loogu baahan yahay in ay daneeyayaasha siyaasadda ee Soomaaliya gaaraan waa heshiiska ku saabsan qaabka doorashada ee loo adeegsan doono kala-guurka lixaad ee qorsheysan inuu dhaco 27^ka December 2020 ee baarlamaanka iyo 7^da Febraayo ee madaxweynaha. Daneeyayaasha waxaa ku jira jilayaal kala duwan oo la’aantood ay adag tahay in xal nabadeed laga gaaro is-mari-waaga ka jira dhanka doorashada xilligan.

Ummadda Soomaaliyeed waxa ay dantu ugu jirtaa in madaxa DF ay DXDF la yeelato xiriir siman ee ku salaysnayn kuwa xulafo la ah iyo kuwa aan la ahayn. Sidoo kale DF waa inay ka dhawrsato ku tirsanaanta mid ka mid labada aqal ee BF, kan kalena hagardaameyso. Intaa waxa dheer, waxaa muhiim ah in la garowsado jiritaanka mucaaradka diiddan qaabka ay DF u waddo arrimaha doorashada.

Ka qayb-gelinta daneeyayaashaas (iyo kuwa kale) hannaanka siyaasadeed oo leh ujeeddo cad oo lagu gaaro xallinta khilaafaadka ayaa ah istaraatiijiyadda keliya ee habboon. Tani waxay u baahan tahay **"in laga wada-xaajoodo danaha kala duwan, natiijaduna noqoto tanaasul - tanaasul ay dhici karto in uusan qof walba farxad gelin, balse dadka u wada cuntami kara."**

Nuxurka isu-tanaasulka siyaasadeed waa in koox kasta oo ku jirta gorgortanka ay aqbasho natiijo ka hooseysa heerka ugu sarreeya ee ay fileysay, si ay u suuragasho gaaritaanka natiijo ay ku midoobaan dhamaan qaybaha kala duwan.

Saddex hab doorasho ayaa ugu badan doodda hadda socota waxa ayna kala yihiin qabashada doorasho HQHC oo wakhtigeedi ku dhacda, kordhinta muddada hay'adaha federaalka iyo qabashada doorashada dadban. Habka koowaad waa habka loogu jecel yahay, laakiin ma jiraan xaalado suuragelin kara, sidaa darteed waa in meesha laga saaro. Aragtida qabta kordhinta muddada waxaa qiil looga dhigaa in dawladda hadda jirta la la siiyo wakhti dheeraad ah lagu hirgasho doorashada HQHC. Xaqiiqa ahaan, hirgelinta doorasho caam ah oo dalka oo dhan isku mar ka dhacda laguma haweysan karo wax ka yar mudda xileed cusub oo affar sano ah. Xitaa haddii la qaato muddo-kordhin gaaban oo hal sano ah ama dawlad sii-hayn ah oo loogu magacdaro midnimo qaran oo laba sano ah ma buuxin doonto shuruudaha doorashada HQHC, balse waxa ay abuuraysaa khilaaf. Dhammaystirka dastuurka oo ay ku jirto astaynta nidaamka doorasho ee Soomaaliya ayaa keligeed qaadaneysa ugu yaraan sannad iyo bar ilaa laba sano, weliba dadaal mintidnima ah.

Iyada oo la tixgelinayo tusaalayaasha kor ku xusan, Doorashadda Dadban ee loo yaqaan 'Enhanced Indirect Election 2016' waa qaab kulmin kara daneeyayaasha in cid gaar ahna u rooneyn. Sharciga doorshada ee is-maandhaafka badani ka jiro laguma maamuli karo doorashada dadban, sidaas awgeed waa in la degsado xeerar iyo habraacyo ay isla oggolaadaan daneeyayaashu ayaa saldhig u noqonaya doorashada. Hay'adaha qaabbilsan hirgelinta doorashada waxa ay iyaguna noqonayaan hay'ado ku-meel-gaar ah oo jiritaankoodu ku eg yahay dhamaadka codbixinta doorashada dadban.

Puntland Development & Research Center

XCNH - PDRC

**Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland**

www.pdrcsomalia.org